

SOOMALIYA

XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO – DISEMBAR 2019



ICRC waxay si dhow ula shaqaysaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) si ay uga jawaabto baahiyaha bana-aadamnimada iyadoo la siinayo sahay cunto oo deg-deg ah ilo biyo nadiif ah oo la cabo, abuur iyo qalabka beeraha iyo tallaalka xoolaha. ICRC waxay sidoo kale bixisaa tababarka gargaarka degdegga ah waxay ka shaqeysaa sidii dib loogu mideyn lahaa xubnaha qoyska kala maqan, booqashada xabsiyada iyo waxay mas'uuliyiinta iyo hawlwadeenada ku dhiirigelisaa xeerka caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL).



536,370

BUKAAN

ayaa 29 xarumo caafimaad kaga faa'iideystey barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah.



148,219

QOF AYAA

waxay ka faa'iideysteen 13 nidaamyada biyo siinta ah oo la qalabeeyey kuwaas oo bixiya biyo nadiif ah.



263,136

QOF AYAA

helay lacagta caddaanka ah ee gargaarka degdegga ah si loogu daboolo baahidooda degdegga ah.

17



MAXAABIIS

oo la sii daayay ayaa loo fududeeyay dub-u-soo noqoshadooda kuwaas oo loo haystay dagaalkii hubaysanaa oo ka dhex maray Puntland iyo Somaliland bishii Maaajo ee 2018kii.



93,846

FARRIIMAHA

LAANQAYRTA CAS AH

(RCMs) oo gacan ka geysatay, fududeynta 94,638 wicitaano telefoon ah, adeegyada baafinta oo gacan ka geysatay helitaanka 292 shakhsi iyo magacyo gaaraya 6,343 oo laga akhriyey liiska "Dadka Maqan" ee barnaamijka idaacadda BBC Soomaali ayaa ku caawisey in dib loo aburo xiriirkii ka dhaxeeyay xubnaha qoyska.



2,564

Ayada oo loo maraayo khadka telefoonka lacag la'aanta ah (373) ayaa waxaa la helay oo la nidaamiyay wadarta 2,564 farriimo oo ka kala timid degaanno kala duwan.



2,405

In ka badan 2,405 hoggaamiyeyasha bulshada ah, haween, dhalinyaro, ka-faai' deysteyaal iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas (SRCS) ayaa lagu wacyi-geliyey Mabaadi' da Asaasiga ah waxaana lagu wargeliyey hawlaha ICRC iyo SRCS iyo barnaamijyada.

Sanadkii 2019, ICRC waxay fulisay barnaamijyadan soo socda:



FU DUDEYNTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

ICRC-da waxay tas-hiilaadka caafimaadka ee heerarka aasaasiga iyo isbitaallada ku taageertaa sahay caafimaad. Waxay tababartaa shaqaalaha caafimaadka si kor loogu qaado xirfadahooda ku saabsan daaweynta iyo maaraynta dadka xarumaha soo gaara oo qaba dhaawacyada ka dhashay rabshadaha hubaysan iyo sidoo kale dadka xanuunsan ee ku sugan meelaha colaada ka jirto.



- **536,370** bukaan ayaa **29** xarumo caafimaad kaga faa'iideystey barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah.
- **95,089** bukaan ayaa waxaa lagu daaweeyay barnaamijka nafaqo-ku-daaweynta bukaan-socodka.
- **33,844** la talin ah ayaa laga fuliyey qolalka xaaladaha deg degga ah ee afarta isbitaal ICRC-du ay taageerto.
- **3,871** bukaan ayaa daryeel ka helay labada xarumood xanaanada deg degga ee ku kala yaal Baydhabo iyo Kismaayo.
- Irida weyn ee laga soo galo Isbitaalka Kismaayo ayaa la hagaajiyay iyada oo la hubinayo in si wanaagsan loo maareeyo dadka soo booqanaya intaas waxaa dheer, dhismaha cusub ee qolka meydka iyo taakuleynta howlaha adeegga dayactirka.
- Ammaanka iyo gaarida Isbitaalka Keysaney ayaa la hagaajiyey iyadoo la dayactiray darbiga wareega, rakabada irdaha iyo dhismaha aaladaha baaritaanka, qolka diiwaangelinta iyo qolalka waardiyaha.
- **3** Xarumo daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo ay maamusho Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) oo ku kala yaala Beledweyne, Madhawe iyo Xabasha Waale ayaa la dayactiray si **150**-ka bukaan ee maalin walba taga xarumaha caafimaadka loogu wanaajiyo helitaanka adeegyada caafimaadka.

Korjoogteyn:

- Wadarta **506** ka-faa'iideystayaal adeegyada Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah (PHC) ka helayey bukaan-socod eegtooyinka Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed(SRCS) oo ay taageerto ICRC ayaa lala xiriiray si loo siiyo caawimaada la socoshada dhamada ka dib. Bukaanadaan waxaa loo gudbiyey isbitaalada si loogu daweeyo xaaladaha deg-degga ah ee caafimaadka iyo kharajka gaadiidka oo laga bixiyey.



FU DUDEYNTA HELITAANKA ADEEGYADA BIYO NADIIF AH IYO NADA AFADDA

Iyada oo la shaqeyneysa Ururka Bisha Cas(SRCS), ICRC iyada oo hagaajinaysa dayactiraysana nidaamyada biyaha hadda jira ayaa waxay ku dadaaleysaa helitaanka biyo nadiif ah. Intaa waxaa dheer, si looga hortago faafidda cudurrada waxaan sidoo kale dadka ay dhibaataadu saameysey ku dhiirrigelinaa wacyiga fayodhowrka.



- **148,219** qof ayaa waxay ka faa'iideysteen **13** nidaamyada biyo siinta ah oo la qalabeeyey kuwaas oo bixiya biyo nadiif ah.
- **123,426** qof ayaa waxay ka faa'iideysteen **5** mashruuc oo dayactir iyo hagaajin ee biyo-qabatinada roobka, gaar ahaan degaanada Guri Ceel iyo Xudur.
- **126,750** barakacayaal ayaa ka faa'iideystey biyo dhaamis deg-deg ah oo ay weheliso kulamo dhiirrigelinta fayodhowrka ah iyo qaybinta saabuun iyo kaniiniga biyaha lagu sifeeyo (aquatabs). Waxaa fududeeyey **10** ka mid ah mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed(SRCS) kadib fatahaad ba'an oo ka dhacay Beledweyne.
- **22** shaqaale ceel ayaa loo tababaray xoojinta awooda Wakaaladda Horumarinta Biyaha ee Puntland (PWDA) ee magaalada Garoowe.
- **70** mutadawiciin ayaa dhiirrigeliyay hab-dhaqanka fayodhowrka ugu wanaagsan waxayna saabuun iyo kaniiniga biyaha lagu sifeeyo (aquatabs) u qaybiyeen **276,354** qof oo isugu jira dadka degaanka ah iyo barakacayaal.





DIB-U-SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA (RFL)

Dad badan ayaa lumiyay xiriirkii ay la lahaayeen xubnaha qoyska markii ay ka cararaayeen colaada hubeysan iyo xaalado kale ee qalalaase. Qoysaska qaar waxay ka maqan yihiin kuwii ay jeclaayeen muddo sannado ah isla mar ahaantaana wareegga barakaca waxay abuuraan lumitaan cusub ee xiriirka qoyska ah maalin kasta. ICRC-da Soomaaliya waxay la shaqaysaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) si loo helo xubnaha qoyska la waayey iyo sidii dib loogu soo celin lahaa loona joogteyn lahaa xiriirka ka dhexeeya.



- Iyada oo loo maraayo isweydaarsiga **93,846** Farriimaha Laanqayrta Cas ah (RCMs) oo gacan ka geysatay, fududeynta **94,638** wicitaano telefoon ah, adeegyada baafinta oo gacan ka geysatay helitaanka **292** shakhsi iyo magacyo gaaraya **6,343** oo laga akhriyey liiska "Dadka Maqan" ee barnaamijka idaacadda BBC Soomaali ayaa ku caawisay in dib loo abuuro xiriirkii ka dhexeeyay xubnaha qoyska.
- **94,638** wicitaano telefoon oo laga hirgaliyay Seylac & Boorama ayaa fududeeyay in la caawiyo muhaajiriin.



BIXINTA GARGAARKA DEGDEGGA AH IYO DIB-U-SOO CELINTA HAB-NOLOLEEDKA

Rabshadaha hubaysan ayaa badanaa burburiya hab-nololeedyada iyadoo qoysaska lagu qasbo inay ka tagaan dhulbeereedkooda ama xoolahooda isla markaana dalaggii uu baaba'o. ICRC iyo Ururka Bisha Cas (SRCS) waxay bixiyaan kaalmo deg deg ah sida cuntada, waxyaabaha muhiimka u ah qoyska iyagoo waliba ka shaqeynaya sidii dib-loogu- soo celin lahaa hab-nololeedyada.



- **263,136** qof ayaa helay lacagta caddaanka ah ee gargaarka degdegga ah si loogu daboolo baahidooda degdegga ah.



- Waxaa cunto loo qaybiyey **98,430** qof.
- In ka badan **76,554** qof ayaa la gaarsiiyey xirmooyin ay ku jiraan waxyaabaha muhiimka u ah qoyska.
- **16,554** qof oo ka tirsan **20** iskaashato beeralay ah ayaa waxay heleen cagaf-cagafyo, mashiinka wax lagu abuur, qalabka caro gediska, abuur iyo bacrimiye oo loogu tala galay wax soo saarka abuurka haruurka iyo galleyda.



- **9,213** carruur oo da' doodu ka hooseyso **5** sano iyo **2,694** haween uur leh iyo/ ama haweenka nuujinaaya oo la il daran nafaqo- darrida dhexdhexaadka ah (MAM) ayaa loo gudbiyay Barnaamijka Bartilmaameedka ee Quudinta Dheeriga ah waxaana lagu daweyey plumpy Sup iyo Super Cereal Plus ee sida u kala horeeyaan.



- **1,752** qof oo bulshooyinka kalluumeysatada Boosaaso iyo degaanada xeebaha ee Kismaayo ayaa helay doonyo, matoorada doonyaha, iyo xirmooyinka kalluumeysiga.
- **1,140** qof ayaa heley qalabka dhaqashada shinnida iyo tababaro farsamo oo ku saabsan dhaqashada shinnida.



- **18,552** qof ayaa ka faa'iideystay deeqaha soo kabsashada beeraha.
- **9,150** qof ayaa heley tababaro ku saabsan xirfadaha ganacsiga iyo deeq lacageed oo wax soo saar leh si kor loogu qaado ganacsigooda.

- **224,500** oo jawaannada ciida lagu shubo ayaa loo qaybiyey dadka fatahaadu saameysay guud ahaan Soomaaliya.

Korjoogteyn:



- Muunad **54,898** ka-faa'iideystayaal u diiwaan gashan gargaarka degdegga iyo barnaamijyada hab-nololeedka oo ku sugan degaano kala duwan ayaa lala xiriiray si korjoogteyn loogu sameeyo qaybinta ka hor.



- Muunad dheeri ah oo ah **6,760** ka-faa'iideystayaal ka mid ah barnaamijka wax ka qabashada abaarta iyo howlo kale oo gargaarka ah ayaa sidoo kale lala xiriiray si korjoogteyn loogu sameeyo qaybinta ka dib.





XAQIJJINTA ISLA-XISAABTANKA DADWEYNAHA DHIBAATADU AY SAAMEYSAY

La xisaabtanka dadka ay dhibaatu saameysey ayaa fure u ah helitaanka aqbalaadda, helitaanka marin iyo hagaajinta ku habboonaanta howlgalka ururka iyo wax ku oolnimada. Inta lagu guda jiro barnaamijyada caawimaada, xaqiijinta la sameeyo caawimaada ka hor iyo ka dib kaliya gacan kama geysato sidii loo ogaan lahaa oo looga hortegi lahaa weecinta gargaarka, qorsheynta iyo hirgelinta oo tayadoodu hooseyso laakiin waxay sidoo kale door muhiim ah ka ciyaartaa si loo xaqiijiyo inaysan howlaha waxyeello u geysaneyn ka-faa'iideystayaasha.



Xarunta Xiriirka Bulshada (373):

- Ayada oo loo maraayo khadka telefoonka lacag la'aanta ah (373) ayaa waxaa la helay oo la nidaamiyay wadarta **2,564** farriimo oo ka kala timid degaanno kala duwan.



FAAFINTA AQOONTA IYO DHIIRIGELINTA MABAAD'IDA BANI'AADAMNIMADA IYO XEERKA CAALAMIGA EE BANI'AADAMNIMADA (IHL)

Xeerarka IHL-ku waxay ujeedadoodu tahay inay dhowraan aadanaha waqtiyada colaada hubeysan. Si loo yareeyo saameynta colaadaha hubeysan iyo in la dhowro dadka ay dhibaatu saameysey, ICRC waxay la shaqeysaa saraakiisha ciidanka si ay u faafiyaan aqoonta IHL iyo xeerarka kale ee quseeya colaadaha hubeysan iyo xaaladaha fulinta sharciga. Intaa waxaa dheer, waxay dhiirrigelisaa barashada IHL-ka ardeyda dhigata **7** jaamacadood oo ku yaala guud ahaan Soomaaliya.



- In ka badan **2,405** hoggaamiyayaasha bulshada ah, haween, dhalinyaro, ka-faa'iideystayaal iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas (SRCS) ayaa lagu wacyi-geliyey Mabaadi'da Asaasiga ah waxaana lagu wargeliyey hawlaha ICRC iyo SRCS iyo barnaamijyada.
- Qiyaas **870** xubnood oo ka tirsan ciidamada qalabka sida iyo kuwa aminga ayaa la siiyay warbixin ku saabsan mabaad'ida bani'aadamnimada iyo IHL-ka iyo sidoo kale hawlaha ICRC-da iyo Ururka Bisha Cas (SRCS) ka wadaan goobaha shaqada.



- facebook.com/ICRCAfrica
- twitter.com/ICRC_Africa
- instagram.com/icrc_afrique
- blogs.icrc.org/Somalia

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe,
Baidoa, Beledweyne and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, Janaayo 2020

ICRC

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaataadooda, waxayna badiyaa la shaqeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.